

## Cidda Aanu Nahay

SPIP waa urur samafal oo bulsho oo la aasaasay 1984 si uu u kaalmeeyo dhibbanayaasha qalalaasaha guriga.

Waxaanu rumaysannahay in dhibbane kasta uu xaq u leeyahay inuu ammaan ku helo gurigiisa iyo xaafadda uu deggan yahay uuna helo caawimaada, adeegyada, iyo khayraadka muhiimka ah ee uu isaga iyo carruurtiisu u baahan yihiin si uu horey ugu socdo oo si bilaa qalalaase ahna ugu noolaado.

## Qaabaynta Mustaqbal Bilaa Qalalaase ah.

## Waxyaabaha Nagula Xasuusto

Ilaa 1984, Mashruuca Xadgudubka Guryaha ee Ismaamulka Saint Paul iyo Ramsey (SPIP) wuxuu:



Siiyey u-doodista dhaqan ahaan iyo luuqad ahaan habboon, wax-ka-qabasho dhib, adeegyo s harci, iyo taageero dhibbanayaasha gaboodfalka guriga



Fududeeyey jawaabta nidaamka ee qalalaasaha guriga



Siiyey waxbarasho, ka-hortagga iyo wacyigelinta dhibbanayaasha gaboodfalka guriga iyo bulshada guud ahaan



Bilaabay jawaabta bulshada oo dhan ah oo ku aadan soo afjaridda qalalaasaha guriga

## Haddii aad Caawimaad u Baahan Tahay, Fadlan Nala Soo Xiriir

Khadka Xafiiska iyo Khadka Dhibta 24-ka Saac:



**651-645-2824**

**888-575-3367**

(Lambarka Bilaashka ah)

*Waxa laguula dhaqmi doonaa  
si naxariis iyo ixtiraam leh.*

*Dhammaan adeegyadu waa qarsoodi  
iyo bilaa lacag.*



The Saint Paul & Ramsey County  
Domestic Abuse Intervention Project  
394 Dayton Avenue | Saint Paul, MN 55102



St. Paul & Ramsey County  
Domestic Abuse  
Intervention Project  
"SPIP"

## Saamayntayada

Sanad kasta, anagoo u marayna wax-ka-qabadkeena waxtarka leh iyo adeegyada kala-guurka:

In ka badan **6,200** oo dhibbane iyo carruurtooda ayaa hela adeegyo toos ah

In ka badan **4,700** oo dhibbane ayaa hela u-doodista sharciga dhibta iyo adeegyada taageerada muhiimka ah isla markiiba kadib dagaalka guriga

In ka badan **3,200** oo dhibbane ayaa hela adeegyada u-doodista maxkamadda madaniga iyo qoyska iyo macluumaadka

In ka badan **600** oo dhibbane ayaa laga kaalmeeyaa helitaanka Amaro Ilaalined

In ka badan **8,000** oo wicitaan taageero, macluumaad, iyo gudbinood ayaa ku jira khadkeena dhibta ee 24-ka saac

In ka badan **5,800** oo dhibbane iyo carruurtooda ayaa hela adeegyada kala-guurka ee muhiimka ah si ay u daboolaan baahiyahooda aasaasiga ah iyo kuwa muddada dheer


Iskaashiga xooggan ee nagala dhexeeya hay'adaha bulshada iyo kuwa dawladda ayaa saamayn wayn ku leh badbaadada dhibbanayaasha iyo carruurtooda, la xisaabtanka dadka gaboodfalka sameeya iyo fursadaha isbeddelka, iyo qaabka bulshadeenu uga jawaabto qalalaasaha guriga.

## Barnaamijyada & Adeegyadayada

- ✓ Khadka Dhibta 24-ka Saac
- ✓ Adeegyada Wax-ka-qabadka Waxtarka leh ee 24-ka Saac
- ✓ Buundooyinka Badbaadada (*Wada-shaqayneed*)
- ✓ Adeegyada Garyaqaanada Sharciga ee Madaniga
- ✓ Gargaarista iyo Waxbarashada Bulshada
- ✓ Adeegyada Kala-Guurka Qoyska
- ✓ Adeegyada Guud & U-Doodista Sharci
- ✓ Adeegyada U-Doodista Isbitaalka/Rugta
- ✓ Helitaanka Caafimaadka Dhimirka ee Adeegyada
- ✓ St. Paul/Qorshaha *Qaran ee Badbaadada*
- ✓ U-Doodista Isbeddelka Nidaamka
- ✓ Adeegyo Dhaqan & Luuqad Ahaan Habboon
- ✓ Adeegyada Gaarka ah ee Dhibbanaha Qofka Wayn ah

## Shaqaalaha

Waxaanu ku dadaalnaa hubinta in barnaamijyo kala duwan, luuqado badan, oo dhaqan ahaan habboon ay bixiyaan shaqaalaha si dhab ah u fahamsan dhaqanka, habnololeedka, iyo xaqiiqooyinka ku gadaaman dadka aynu rabno inaanu u adeegno.



*“Waad mahadsan tihiin (dhammaantiina) sida aad iiga caawiseen dhallaankayga iyo naftayda. Waxaad ahayd ilayskayga qorraxda saacadaha iigu mugdiga badnaa... Neefsiga markaanan neefsan karayn.”*

– DHIIBBANE/BADBAADE

